



The Transitional Federal Parliament of Somalia Republic
(TFP)
Office of the Acting speaker

Ref.XGB/01/12/11

Date : 14/12/2011

**Ujeeddo: Go'aankii Barlamaanka FKMG Ee Ku Aadanaa Xilkaqaadista
Guddoomiyihii Hore Ee BFKMG Mudane Shariif Xasan
Sheekh Aadan**

Waxaa Maanta oo ay taaariikhdu tahay 13ka Disember 2011ka Xarunta Golaha Shacbiga Ee BFKMG, ku yeeshey Shir xildhibaanno tiradoodu gaarayso **283 mudane**. Ajandaha shirka ayaa ahaa in laga doodo soojeedintii (motions) ay keeneen xildhibaanno tiradoodu dhantahay **202 mudane**. Ajandaha oo looga hadlaayay In Codka Kalsoonidda loo Qaado **Guddoomiyihii Hore Ee BFKMG Mudane Shariif Xasan Sheekh Aadan**.

Guddoomiyihii Hore waxaa lagu soo Eedeeyey Ku Tagri Falid Awoodeed, Iyo Ku xadgudub Axdiga FKMG, Iyo Xeer-hoosaadka BFKMG sida ku cad Mooshinka Halkan ku lifaaqan, kuwaas oo ay ka mid yihiin:-

1- In uu si caddaan ah u diidey in uu qabto soojeedimo dhawr ah (motions), iyo in la furo fadhiyadda golaha baarlamaanka FKMG.

A- in la horkeeno golaha baarlamaanka Roadmarpka Si loo meelmariyo, isla markaana la waafajiyo Axdiga FKMG.

B- Iyo inuu qabto mooshimkii isaga lidka ku ahaa.

C- Wuxuu diiday dhaqangelinta Go'aankii Baarlamaanku ku gaaray in usbuuciiba la shaqeeyo Sedex maalmood oo kala ah Sabti, Isniin, Iyo Arbaco si loo dardargeliyo habsami u socodka hawlaha baarlamaanka.

Arintaasi waxa ay jaahwareer ku riddey golaha iyo xubnaha waxaanu asaga oo ogsoon xaladda taagan ee cakiran iska aadey safar dalka Talyaaniga asagoo kuxigeenkiisa 1aad M/ne Cabdiwali Ibraahim Sh Muuddey kula sii balamey in barlamaanku sii xirnaado. Sidaasi oo kale kuxigeenka Guddoomiyuhu waxa uu sidaasi si le'eg u diidey in uu soojeedimaha kala geddisan ka qabto xildhibaannada xarunta Barlamaankana furo si shirar loo qabto. Arrimaha aan kor ku soo xusney waxa ay dhaliyeen in xildhibaannadu ay maanta iskood isugu soo aruuraan xarunta

Tell: 002521-

Email:.....@yahoo.com

barlamaanka ayaga gacan dhinaca amniga ah ka heley ciidamada AMISOM eek u sugan dalka. Sidaasi ayuuna furitaanka barlamaanka iyo qabshada shirku ku hirgaleen.

Hadaba markii ay soo xadireen in ka badan shirbeeggii – kooramkii – oo ah 283 Mudane, waxaa la gudagalay hawlsocodsiinta shirka ayada oo farriin loo direy kuxigeenka 1aad ee guddoonka barlamaanka M/ne Cabdiwali Ibrahim; Taasoo Looga codsanayey inuu yimaado si uu u guddoomiyo Shirka Baarlamaanka oo Tiraduu ku furmi lahaa joogto, sida uu qorayo Qodobka 38aad/ xarafkiisa B ee Axdiga FKMG. hayeeshee wuu diidey inuu shirka Guddoomiyo sidaas daraaddeed ayey Xildhibaanadu Mareen dariiqii Sharciga ahaa ee uu tilmaamayay isla qodobka 38 aad/ farqadiisa C ee axdiga FKMG.

Hadaba Arrintaasi kadib waxaa ayada oo la raacayo qodobka 38aad ee Axdiga FKMG faqraddiisa C loo doortey Xilka Shir Guddoonka Fadhiga Golaha Baarlamaanka FKMG, M/ne madoobe Nunnaw Maxamed oo ah xubin ka tirsan baarlamaanka FKMG, isla markaana ah guddoomiyaha Guddiga Dastuurka iyo arrimaha federaalka ee BFKMG, islamarkaana loogu codeeyey cod aqlabiyad leh in uu noqdo Guddoomiyaha KMG ee Golaha Baarlamaanka.

Hadaba intaa ka dib, guddoomiyuhu wuxuu ogolaaday in la gudagalo socodsiinta shirka, waxaana lagu furay aayadaha qur'aanka, ka dibna waxaa lagudagalay akhrinta ajandaha shirka, kaasoo ku aadanaa mooshinkii ka dhan ka ahaa Guddoomiyihii BFKMG Mudane Shariif Xasan sheikh aadan oo uu golaha ka hor akhriyey Garyaqaan Mudane Sheegow asaga oo uu ayadey Xildhi. Ismaaciil Axmed Nuur iyo xildhibaan Cabdirashiid Aadan Gabyow. Waxaana isqorey 16 xubnood oo arrinta si fiican oo faahfaahsan uga Hadley. Intii dooddu socotey waxaa shirguddoonka KMG loogu dhibey soojeedin (motion) ay saxiixeen **50 xildhibaan** kuwaasi oo codsadey in dhiibashada codku noqoto gancantaag si wadarogolaansho ahaa waxaa lagu aqbaley tiro **283 xildhibaan, in codka kalsoonidda guddoomiyaha uu noqdo gacan taag.**

Intaa ka dib, Markii ay dooddii dhamatey waxaa la gudagalay cod uqaadidii kalsooni kala noqoshada guddoomiyihii BFKMG, waxayna codeyntii u dhacdey sidan soo socota:-


- A) Tirada soo xaadirtey = **283 xildhibaan**
- B) Tirada ogolaatey kalsooni kala noqoshadda guddoomiyaha = **280 xildhibaan**
- C) Tirada diiddey = **2 xildhibaan**
- D) Tirada ka aamustey = **1 xildhibaan**

Sidaasi ayey xilkaqaadistii Guddoomiyihii Hore BFKMG Mudane Shariif Xasan Sheekh Aadan sharci ahaan ansax u noqotey.

Haddaba Guddoomiyaha KMG Ee Golaha Barlamaanku:-

Tell: 002521-

Email:.....@yahoo.com



Markuu arkey Qodobka 3aad ee Axdiga FKMG faqradihisa 1,2,iyo 3aad.

Markuu arkey qodobka 28aad ee Axdiga FKMG.

Marka uu arkey qodobka 33aad ee Axdiga FKMG.

Marka uu arkey qodobka 38aad ee Axdiga FKMG faqraddisa 1aad xarafka (C).

Marka uu arkey qodobka 13aad ee xeer-hosaadka golaha faqraddiisa 1aad xarafka (D) iyo faqradaha 2aad iyo 3aad ee isla qodobkan.


Markii ay u caddaatey natiijadii cod bixinta Golaha ee aheyd Kalsooni ka Noqoshadda Guddoomiyihii Hore Ee BFKMG Mudane Shariif Xasan Sheekh Aadan.

Inuu Xilkiisii Waayay, wuxuu si waafaqsan Axdiga FKMG Iyo Xeer-hoosaadka Baarlamaanka FKMG uga hor dhawaaqay Golaha Hortiisa, inay Kalsooni Kala Noqoshadaasi Waafaqsan Tahay Axdiga FKMG Iyo Xeer-hoosaadka BFKMG:

Wuxuu Go'aamiyay:

- 1- In laga bilaabo maanta oo ay tr.du ku began tahay 13-12-011 Guddoomiyihii Hore Ee BFKMG, Mudane Shariif Xasan Sheikh Aadan Uu Yahay Mudane Ka Tirsan Baarlamaanka Federaalka KMG.
- 2- Muddo 30 Casho Gudahooda oo ka bilaabata maalinta la doortay Guddoomiyaha KMG, ayaa lagu soo dooranayaa Guddoomiyaha cusub Ee baarlamaanka FKMG, sida uu qabo Qodobka 13 aad/ Farqadiisa 3aad ee Xeer-hoosaadka BFKMG.

Mahadsanidiin


Guddoomiyaha KMG Ee BFKMG
Md. Madoobe Nuunow Max'ed

Tell: 002521-

Email:.....@yahoo.com 

Faafin: SomaliTalk.com